

OGAYSIIS KU SOCDA DADWEYNAHA: XUQUUQDAADA SIDA UU QABO TITLE VI EE XEERKA XUQUUQDA RAYIDKA


Sharciga federaalka iyo ka gobolka ayaa mamnuucaya takoorka ku salaysan isirka, midabka, asalka qaranka, jinsiga, da'da, naafanimada, heerka dakhliga hooseeya, caqiidada, diinta, xaaladda guurka, jinsi doorashada, aqoonsiga jinsiga, iyo xaalada ku saabsan gargaarka dadweynaha. MnDOT waxaa ka go'an inay hubiso in aan qof jooga Gobolka Minnesota looga reebin ka qaybgalka, aan loo diidin nacfiyada, ama aan loogaga takoorin xaaladaha la ilaaliyo wixii barnaamijyo iyo adeegyo ah, ama hawlaha ay maamusho waaxdu iyo qayb-hoosaadyadooda iyo qandaraaslayaashooda. Intaa waxaa dheer, MnDOT waxaa ka go'an inay hubiso in barnaamijyadeeda ay ku soo daraan marin u helid loogu talagalay dadka aqoontooda Ingiriisigu ay xaddidantahay.

Qof kasta oo aaminsan in iyaga, shaqsi ahaan, ama xubin kasta oo ka mid ah dabaqad gaar ah oo dad ah, lagu sameeyay takoor ku salaysan jinsi, midab, asal qaran, jinsi, da'da, naafanimada, heerka dakhliga hooseeya, caqiidada, diinta, xaalada guurka, jinsi doorashada, aqoonsiga jinsiga, ama xaalada ku saabsan gargaarka dadweynaha. ayaa [waxay ka xarayn karaan cabasho takoor](#) MnDOT. Dhammaan cabashooyinka ay hesho MnDOT waa in si degdeg ah loogu gudbiyo Isuduwaha Title VI (Title VI Coordinator) ee Xafiiska Xuquuqda Madaniga.

Si aad u soo gudbiso cabasho, fadlan la soo xiriir Byron Millea, Title VI Coordinator, 395 John Ireland Blvd., MS 170, St. Paul, MN 55155, Byron.Millea@state.mn.us. Taleefan: 651-366-3315.

Haddii kale, cabasho waxaa loo gudbin karaa Federal Highway Administration iyada oo loo soo dirayo cabasho Xafiiska Qaybta Minnesota, 380 Jackson Street, Suite 500, St. Paul, MN, 55101. Taleefan: 651-291-6100.

Fadlan la soo xiriir Isuduwaha Title VI (Title VI Coordinator) haddii aad u baahan tahay macluumaad lagu turjumay luqad kale, ama aad u baahantahay macluumaad qaab kale ah.


Guddoomiyaha Gaadiidka
Gobolka Minnesota (MnDOT)

9/22/2021
Taariikhda